



Warbixin ka timid maamulka oo ku saabsan Covid-19

Bishii september 29dii waxaa la soo saaray xaddeyn cusub oo ku saabsan Covid-19, bulshada ayaa laga qaaday xayiraadii saarnayd, hadda waxaan haysanaa fursad ah inay dad badan kulmi karaan. Laakiin FHM waxay ku qortay boggooda internetka inay muhiim tahay in qof kasta oo fursad u hela inuu is tallaalo si looga hortago inuu bulshada ku dhex faafo caabuqa hadda socda.

Taas macnaheeda maxay tahay iyo sidee bay noo saamaynaysaa annaga dugsiga xannaanada.

Waxaa muhiim ah in dhammaanteen, shaqaalaha, waalidiinta iyo carruurta aan sii wadno inaan raacno xannibaadaha hadda ee maamulka caafimaadka dadweynaha ay noo soo jeediyeen haddii qofku isku arko astaamaha lagu garto cudurkan. Qof walba weli waxaa saaran mas'uuliyad weyn si looga fogaado caabuqu inuu faafo.

- Haddii ay calaamado isku arkaan shaqaalaha, carruurta iyo waalidiinta waa inaysan imaanin dugsiga xannaanada. Haddii carruurta lagu arko astaamo, dugsiga xannaanada wuxuu la xiriirayaa waalidiinta.
- Haddii ay jiraan calaamado, ilmuhu wuxuu joogayaa guriga ilaa inta uu leeyahay calaamadahaas iyo laba maalmood oo kale taas oo macnaheedu tahay in calaamadahii ay ka dhamaadeen.
- Toddoba maalmood ka dib, ilmuhu wuxuu ku noqon karaa dugsiga xannaanada xittaa haddii ilmuhu leeyahay astaamo khafiif ah sida qufac yar ama duuf yar. Labada maalmood ee u dambaysa waa in ilmuhu ahaa mid aan qandho lahayn oo si guudna u caafimaad qabay.
- Jadwalka gacmo -dhaqashada ayaa ku sii jiri doona dugsiga xannaanada. Haddaba waxaad ka qayb qaadan kartaan inaad nagu caawisaan inaad gacmihiina iyo kuwa caurrtiinaba aad ku dhaqdaan biyo iyo saabuun inta aydaan imaanin dugsiga xannaanada.
- Waxbaridda ayaa sii ahaan doonta mid inta badan banaanka lagu qaato.
- Dugsiga xannaanada carruurta waa goob shaqo welina way jirtaa halista ah in cudurka la qaadsiiyo shaqaalaha. Dhammaan dugsiyada xannaanadu waxay si joogto ah u fiiriyaan amaba u raacaan nidaamkooda, taas oo

macnaheedu tahay in dugsiyada xannaanadu ay ku kala duwanaan karaan nidaamka sida marka ilmaha la keenayo iyo marka la kaxaynayaba.

- Wadahadallada horumarka cunuga ayaa la idinku casumi doonaa inta lagu jiro dayrta, digital ahaan ama goobta taas oo ku xiran dugsiya xannaanada fursada ay u heli karaan inay jirto goob lagu kulmi karo.
- Shirka waalidiinta oo ay dad badan ka soo qayb gali karaan maamulku wuxuu dib ugu dhigay ilaa laga gaaro xilliga gu'ga 2022.

Med vänlig hälsning

Ulrika N Eriksson

Verksamhetschef förskola